

Shir Beesha Cumar maxamuud oo kadhacayay beerta Amiir Maxamuud Yuusuf Ciise ee Gaalkacyo



Shirkan oo uu gudoominayey Garaad Maxamed Cilmi Shirwac oo ahaa Isimka ugu weyn Isimada joogay isla markaasna wakiil rasmiya ka ahaa Islaan Bashiir Islaan Cabdille oo Hawlo shaqo uga uga maqnaa shirka.



Shirkan aadka loo agaasimay oo ay soo qaban qaabiyeen Ganacsato iyo waxgarad dalka dibadiisa kayimid ayaa aad loogu lafa guray muhiimada midnimada beesha iyo dhinaca horumarka sidii deegaanada beesha looga hirgalin lahaa.



Isimadii halkaa kahadlay oo uu ugu horreeyo Garaad Maxamed Cilmi Shirwac, Amiir Maxamuud Yuusuf Ciise, iyo Caaqil Abdiwahaab Maxamuud Gurey, waxay dhamaan isamadu kahadleen. In aan marna laga nasan lagana daalin sidii ay ku suurto geli lahayd soo celintii midnimada Beesha Cumar Maxamuud, naf iyo maalbana loogu garab istaagi lahaa



Waxaa sidoo kale goobta kahadlay siyaasiyiin ay kamid ahaayeen Maxamed Cali Yuusuf (Gaagaab) Gudoomiyaha Gobolka Mudug Maxamed Yuusuf Jaamac, oo dhamaantood xusay muhiimada ay midnimadu leedahay.



Gaba gabadii shirku wuxuu kusoo idlaaday is afgarad iyo jawi wanaagsan, waxaana ka mida qodoba hoosta laga xarriiqay in amniga dhulka beeshu degto la wada ilaaliyo, horumarkiisana laga wada sheqeeyo iyadoo lugu dadaalayo isku xirnaanta beesha.



Waxaa kaloo la isku raacay in beeshu hormuud ka noqoto midnimada guud ee gobolka, Nabada iyo iskaashiga beelaha kale ee reer Puntland iyo kuwa Soomaaliyeedba, hannaanka dawladnimadana lawada ilaaliyo.

Waxaa soo tabiyay

Mohamed Ahmed

Kala xiriir email:afeeysons@gmail.com